



***Ka soo qaybgal Kulanka Macluumaadka Casriyeynta Ida B. Wells iyo
Booqashooyinka Dugsiga
Arbacada, Abriil 30, laga bilaabo 4 pm ilaa 6 pm gudaha IBW Auditorium Foyer***

Qoysaska Dugsiga Sare Ida B. Wells & Qoysaska Kooxda ee Qaaliga ah,

Fadlan nagu soo biir Arbacada, Abriil 30, laga bilaabo 4 pm ilaa 6 pm gudaha Hoolka IBW Auditorium Foyer ee Kulanka Macluumaadka Naqshadaynta Bulshada kaas oo soo bandhigi doona naqshadihii ugu dambeeyay iyo cusboonaysiinta mashruuca ee mashruuca Casriyeynta Ida B. Wells. Booqashada dhismaha dugsiga hadda waa la heli karaa.

Hakin ku meel gaar ah ka dib, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay dib u bilaabeen qorshaynta casriyeynta Dugsiyada Sare Cleveland, Jefferson, iyo Ida B. Wells—iyaga oo qaadaya hab kharash-ku-ool ah oo lagu gaarsiinayo jawi waxbarasho tayo sare leh ee ardayda iyo shaqaalaha.

Ka soo qaybgal wakhti kasta inta u dhaxaysa 4pm iyo 6pm Abriil 30 gudaha IBW Auditorium Foyer

Kooxda naqshadaynta ee Ida B. Wells waxay si dadaal leh uga shaqeeyeen si ay u yareeyaan kharashaadka iyagoo ilaalinaya isla qaababka naqshadaynta ee ay mudnaanta siiyeen bulshada Ida B. Wells iyada oo loo marayo nidaamka hawlgelinta dadweynaha ee ballaaran. PPS waxaa ka go'an in ay ilaaliso tayada iyo barnaamijyada markii hore la rabey si loo daboolo baahiyaha ardayda, shaqaalaha iyo bulshada.

Kulankaan macluumaadka waa fursadaada inaad la kulanto kooxda naqshadeynta, wax ka barato Casriyeynta Ida B. Wells, oo aad ku soo booqato dugsiga haddii aad rabto. Dhacdadan ayaa lagu qaban doonaa Hoolka IBW Auditorium Foyer waxaana la bixin doonaa cunto fudud. Waxaan rajeyneynaa inaan ku aragno halkaas!

Dugsiga Sare Ida B. Wells ee cusub waxaa ku jiri doona:

- Tiyaatar 500-kursi ah
- Goobta jimicsiga IYO goobta jimicsiga Auxiliary
- Fasalada CTE ee Casriga ah

- Fasalka CTE ee Dhismaha
- Goobta Bulshada (Commons Space)

Jadwalka Casriyeynta Ida B. Wells

Qorshaynta iyo shaqada naqshadaynta Ida B. Wells & Cleveland waxa la maalgeliyay iyada oo loo marayo Bond-ka Dugsiga 2020. Lacagaha dhismaha ee Ida B. Wells iyo sidoo kale dugsiga sare Cleveland waxay u baahan yihiin inay ka yimaadaan Bond-ka Horumarinta Dugsiga ee ku beegan codbixinta doorashada May 20-keeda, 2025.

Jadwal la cusboonaysiiyay oo dhismaha ayaa la samayn doonaa iyadoo ku xiran natiijada doorashada May 20-keeda. Inta lagu jiro muddada dhismaha, ardayda iyo shaqaalaha Ida B. Wells waxay joogi doonaan dhismaha jira.

Si joogto ah u booqo websaydka si aad macluumaad dheeraad ah u hesho

Websaydka casriyeynta Ida B. Wells, <http://pps.net/IdaBWellsBond>, waxa ay haysaa horumarkii ugu dambeeyay ee mashruucii, fursadaha ka qaybgalka ee soo socda, iyo agabkii hore ee kulanka si loo eego.

Waad ku mahadsan tahay inaad naga caawisay abuurista Dugsiga Sare Ida B. Wells oo la casriyeeyay.

Kooxda Mashruuca Casriyeynta Ida B. Wells